**Hanaanka**

Adeega Caafimaadka Fairview

**Xeerka**

# Xeerka Adeega Dhaqaale biilasha Bukaankaiyo uruurinta Xeerka.

**Ujeedo:**

Xeerkan wuxuu qeexayaa Adeega Caafimaadka Fairview iyo HealthEast (wada shaqeyn "Fairview) hanaanka biilasha bukaanka iyo uruurinta kharashaadka kuwaasoo la qaadi doono haday dhacdo in kharashka daryeelka caafimaadka la dhiibi waayo ay bixisay Fairview sida howlaha uruurinta kharashaadka caadiga ahayn. Mabaadiida hagga Xeerkan waa in la daaweeyaa dhammaan bukaanada iyo damaanadqaadayaasha mas'uullka ah (hadda kadib loogu yeeri doono "bukaan (o)") si xushmad iyo qadarin isla eg ah, si loo hubiyo in la raacay nidaamka biilasha iyo uruurinta kharashaadka ku habboon, iyo in la hubiyo dadaalo wax ku ool ah in la sameeyay si loo go'aamiyo in bukaanka u qalmo caawinta hoostagta Xeerka Kaalmada Maaliyadeed ee Fairview (hadda kadib loogu yeeri doono "FAP" ).

**Xeerka Bayaanka:** :
Kadin marka ay bukaanadeena helaan adeega, waa Xeerka Fairview in biil lagu qoro bukaanada iyo bixiyayaashooda uu khuseeyo wakhtiga iyo sida saxda ah. Xilliga lagu jiro hanaanka biilalka iyo uruurinta kharashaadka, howlwadenada Fairview waxay ku howlanaan doonaan bixinta adeeg tayo leh waxayna si wakhtiyaysan dabogal ugu sameyn doonaan xisaabaadka aan la bixin. Howlwadeenada Fairview sidoo kale way u feejignaan doonaan arrimaha muujinaya in bukaanka musharrax u yahay daryeelka caafimaadka hoos yimaada FAP iyo ka caawinta bukaanada hanaankaas.

**Faahfaahinada:**

**ECAs** – Tallaabooyinka Kharash Uruurinta Caadiga ahayn: Ku dar howlahan soo socda ee kharash uruurineed:

- Ka iibinta deynta bukaanka qof kale sida ugu badan.
- Ka warbixinta macluumaadka daymaha oo qaldan ee ku saabsan bukaanka hay'adaha daynta.
- Ku wareejin ama diidis daryeelka daruuriga caafimaadka ee hadda iyadoo ugu wacantahay xisaabaad hore aad bixinin, ama xisaabaad hore ee kaa raba inaad bixiso si aad u hesho daryeelka caafimaadka daruuriga hadda.
- Tallaabooyinka u baahan hanaanka sharci ama garsoo; ay ka mid yihiin sheegashada hantida, xayiraada mushaarka, xayiraada koontooyinka bangiga ama xayiraadaha, bilaabitaanka dacwo, iyo tallaabooyinka kale la cayimay.

**Caafimaadka Daruuriga**
Daryeelka caafimaadka daruuriga ah waa daryeelka in, fikrada Fairview la aqoonsaday dhakhaatiirta daaweyneyso/farmashiiyayaasha iyo sida waafaqsan heerka daryeelka, waa sababtaloogu baahantahay:

- Si looga hortago bilowga ama ka darida jirada, xaalada, ama curyaannimada;
- Si garto ogaanshaha nooca cudur;
- Si loo siiyo daawada, daaweynta ama daaweynta soo celinta oo jir ahaan, dhaqan ahaan iyo/ama xaaladaha caafimaadka maskaxda; iyo/ama
- Si loo caawiyo shaqsiga in uu gaaro ama joogteeyo kartida shaqada qabashadahowlaha joogtada ah, tixgelinta labadaba kartida shaqada shaqsiga iyo kartiyadaas shaqada ee ku haboon shaqsiyaadka isku da'da ah.
- Caafimaad ahaan adeegyada daruuriga ah waxaa ku jiro adeegyada bukaan socodka iyo bukaan jiifka sida loogu xilsaaray Ciwaanka XIX ee Xeerka Amniga Bulshada Faderaalka, iyo adeeg walboo bukaan jiifka ama bukaan socodka ee isbitaalka ee ku daboolan oo loo tixgeliyay in uu yahay caafimaad ahaan muhiim sida waafaqsan Ciwaanka XVIII ee Xeerka Ammniga Bulshada Faderaalka. Intaa waxaa dheer, daryeelka ay bixisay xarunta isbitaalka iskaashiga ama LLC ee taas oo isbitaalka qabo raasumaalka ama danaha faa'iidooyinka waxay u qalantaa gargaarka dhaqaalaha. Adeegyada waa in lagu sameeyaa sida waafaqsan heerarka qaranka ee waxqabadka caafimaadka guud ahaan la ogolaaday xiliga adeegyada la

bixiyay. Adeeg walba waa in uu ku filnaadaa tirada, muddada, iyo baaxada si macquul ah loogu gaaro ujeedadeeda.

- Caafimaad ahaan adeegyada daruuriga ah kuma jiraan adeegyada waxqabadka tijaabada ah ama muuqaalka dabiiciga ah.
- Xaaladaha kale ee taageerayo daaweynta daruuriga ee gaarka ah waxaa ku jira:
  - Marqaatiga saayniska tayada sareyso ee bukaanada xaaladaan gaarka ah qaba wuxuu ka faa'iidayaa daaweynta la codsaday;
  - Nooca faa'iidada caafimaad ahaan muhiimka u ah; iyo/ama
  - Daaweyn kale oo ka jaban iyo dariiqyada lagu maaraynayo waa la tixgeliyay oo la diiday.

**Waxqabadyada Tijaabada**

Waxqabadka tijaabada waa daawayn iyo dhexgal waxqabadaysan oo gabi ahaanba ogolaata si badbaado ah oo wax ku ool ah qubarayaalka goobta ku haboon ee baaritaanka, ka hortaga ama daaweynta xaalada caafimaadka sida waafaqsan tixgelinta. Marka la go'aansanayo in waxqabadka uu yahay tijaabo, xaqiiqyada xigga way ku jiraan balse kuma koobna oo kaliya:

- haddii waxqabadka kaliya loo heli karo sida qeybta ka ah daraasada caafimaadka;
- haddii qoraalada quseeyo ay yihiin wacitaanka joornaalo dib loo eegay oo daraasada dheeraad ah ee waxqabadka xaalada caafimaadka sida waafqsan tixgelinta; ama
- haddii waxqabadka loo isticmaalayo aag kale oo jirka ah, oo si weyn u kala duwan, iyo/ama xaalad caafimaad kala duwan, kadib guud ahaan ayaa u ogolaadeen qubarayaasha kale ee goobta ku haboon [oo gudaha Fairview , the Twin Cities, Minnesota, the US, iwm.].

**Culeyska Dhaqaalaha Aan la joogteyn karin**

Xaalada halka ay jiraan qarash muhiim ah ee hay'ada ka reebida canshuurta HealthEast si ay u siiso adeega iyo dhacdada baahidsa bukaan imaan karo ee adeega waa mida sida hay'ada aysan bixin karin isla adeega iyada oo aan laheyn lacag celin ku fillan ee dhammaan bukaanada lamidka ah iyo ku haro masuuliyada lacag ahaan.

**Qoyska**

Ujeedooyinka xeerkaan, qoyska waa:

- Lamaane is qabo iyo ku tiirsanayaal walba, sida lagu qeexay tilmaamaha IRS.
- Shaqsiga leh ku tiirsanayaal sida lagu qeexay tilmaamaha IRS ta.
- Qof aan la qabin oo aan la heyn dad ku tiirsan.

Tilmaamaha saboolnimada waxay si gooni ah u quseyneysaa si gooni ah qoys walba oo qoyska ku jira haddii qoyska uu ku jiro wax ka badan hal qeyb oo qoys ah.

**Qaabka:**

I. *see also*

I. Biilka Bukaanka:

Waa himilada Fairview in qaansheegadka caymiska si sax ah oo wakhtiyaysan loogu qoro biilka. Inkastoo aan ku tiirsanahay macluumaadka iyo warbixinta ka timaada bukaanka iyo bixiyayaasha, Fairview waxay bixinaysaa adeeg dhameystiran dib-u-eegis ah si loo hubiyo in bukaanada helaan macluumaadka koontooyinka iyo xisaabaadka ayna helaan fursada ay lacag ku bixiyaan iyo/ama u codsadaan daryeelka samafalka. Hanaanka biilka waxaa caawin doona tilmaamaha soo socda:

A. Dhammaan bukaanada haysta caymiska, Fairview waxay biilka u diri doontaa bixiyayaasha saddexeeyaha ah (sida ku cad ama ay uu xaqiijiyo bukaankasi wakhtiyaysan, iyadoo laga reebayo ku soo socda:
   - Caymiska Dalka Dibbadiisa – Bukaanka waxaa la siin nuqul biilka ah si uu ugu gudbiyo caymiskooda. Fairview waxay ka rajaynaysaa bixinta kharashaadka 90 maalmood guddohooda. Fairview waxaa laga yaabaa, iyadoo ikhtiyaarkooda gaarka ah isticmaalaysa, in kiis walba u gudhigaya inay dooqdaan in laga bixiyo biilka caymiska wadanka iyadoo la qadarinayo bukaanka.

B. Sida waafaqsan Heshiisyada Heerarka Kharash Uruurinta Qareenka Guud imminka ee Fairview iyo HealthEast, dhammaan dadka aan caymiska haysan ee degan Minnesota ama Wisconsin ee hela adeegyada daruuriga isbitaalka ku salaysan waxay helayaan qiimo dhimis caymis-laawaha. Qiimo dhimista caymis-laawaha waxay lamid noqon kartaa qiimo dhimista la siiyo bixiyaha kharashka aan dowliga ahayn heshiiska naga dhaxeeyo iyo baaqi walba harsan waxaa lagu qorayaa bukaanka si wakhtiyaysan iyadoo la

socdo biilka la sharaxay oo qayb ka ah hanaanka xisaabaadka caadiga ee Fairview. DhammaanDhammaan bukaanada waxay codsan karaan cadaynta xisaabta xilli kasta.

C. Hadii qaansheegadka la diido (ama uu ka howlgelin) bixiyaha iyadoo ugu wacantahay khaladka Fairview, Fairview biilka ka badan ku qori mayso bukaanka qaybta ka badan hadii bixiyaha waajibka ku tahay bixiyay qaansheegadka.

D. Haddii qaansheegad la diido (ama uu ka howlgelin) bixiyaha iyadoo ugu wacantahay arrimo ka baxsan xaddidaada Fairview, Howlwadeenada Fairview ayaa dabageli doona bixiyaha iyo bukaanka sida ku habboon si ay xal uga gaaraan qaansheegashada. Haddii xal laga gaari waayo qaansheegashada kadib marka la sameeyo dadaalo dabagal macquul ah, Fairview waxay biilka ku qori doontaa bukaanka ama tallaabo waafaqsan heerarka habdhaqanka wanagsan ee Fairview ayay qaadi doontaa.

E. Dhammaan bukaanada biilka lagu qoray waxay yeelan doonaan fursad ay kula xiriiraan Fairview eek u saabsan kaalmada maaliyadeed ama kaga hadlaan qorshe lacag-bixin xisaabaadkooda xilli kasta ee hanaanka biilka.

II. Kharash Uruurinta Bukaanka iyo Hay’ada:

A. Ugu yaraan 3 caddeyn xisaabeed ee uruurinta xisaabaadka shaqsiga bixiyo ayaa boostads loogu soo dirayaa ama ii-meel ciwaanka la aqaano ee ugu dambeeyay aad bixisay, si kasta ay ahaataba, looma baahna in lasoo diro caddeyn xisaabeedyo dheeraad ah kadib marka bukaanka soo gudbiyo codsiga dhameystiran ee kaalmada maaliyadeed ee hoostaga FAP ama gebi ahaan bixiyay. Ugu yaraan 60 maalmood waa inay kasoo wareegataa inta u dhaxeeyso tan kowaad iyo labaad 3 fariin diris ee loo baahanyahay. Waa waajib saran bukaanka in uu bixiyo ciwaanka saxda fariin dirista xilliga adeega ama bixitaanka. Haduu akoon laheyn cinwaan sax ah, howlwadeenada ayaa go’aaminaya haddii qaab kale oo lagula xiriiri karo bukaanka jiro. Dhammaan caddeymaha xisabaadka kalliga ee shaqsiga bixiyo way kamid ahaanayaan balse kuma koobna kaliya:
   1. Qoraal kooban sax ah oo adeega isbitaalka bixiyo ku qoran caddeyn xisaabeedka.
   2. [1]Ogaysiis qoran oo qarsoodi ah kaasoo ogeysiinaya iyo u sheegaya bukaanka helitaanka kaalmada maaliyaded e hoostagta FAP-da isbitaalka, uu kamid yahay lambarka teleefoonka waaxda iyo ciwaanka shabakada tooska kaasoo nuqulada dokumeentiyada laga heli karo.

B. Haduu bukaanka dood ka keeno xisaabaad kiisa/keeda iyo/ama codsado caddeymaha xisaabaadka, Fairview way ku bixinaysaa caddeymaha la codsaday muddo 7 maalmood gudohooda. Haddii jawaab aad kku heli waydo muddo 7 maalmood ah, waqad qiraal ayaa muddo 7 maalmood gudahood laguugu soo dirayaa akoonkana wuxuu xayirnaanayaa 30 maalmood kahor inta aan la bilaabin lacag uruurin dheeraad ah ilaa taariikhda jawaab lagaaga soo dirayo sida waafaqsan Xeerka Cabashada Fairview. Jawaabta hordhaca ah waxaa sidoo kale ay quseeysaa hay’adaha kharash uruurinta Fairview iyo qareenada kharash uruurinta.

C. Walaaca daryeelka bukaanka waxaa loo gudbinayaa xiriirka bukaanka si ay u xalliyaan una siiyaan bukaanka jawaab. Koontooyinka (ada) sida ku habboon ayaa loo xayiri.

D. Iyadoo loo amarayo isticmaalka caddeymaha xisaabaadka biilka, waraaqaha iyo wicitaanada, Fairview waxay samayni dabagal ficilo oo taxadar leh ay kula xiriirayso bukaanada si loo xalliyo xisaabaadka aad la bixin, ay ku jiraan feejignaanta bukaanka suurogalka ee u qalma daryeelka samafalka. Haddii aan xisaabaadka la bixin xilliga geedi-socodka, baaqiyada aan la bixin waxaa loo weecin karaa hay’ad seddexeeye ama qareen si ay u uruuriyaan.

III. Tallaabooyinka Kharash Uruurinta Sharciga iyo Kharash Uruurinta Caadiga Ahayn:

A. Iyadoo loo hoggaansamayo shuruucda Xeerkan, Fairview waxay dul dhigi doontaa koontooyinka leh kharash uruurin sharci ah iyo Dhammaandhammaan tallaabooyinka sharciga, ay kamid tahay ECAs, si loo helo kharash bixinta adeega caafimaad ee la bixiyay.

B. Tallaabooyinka Kharash Uruurinta Caadiga Ahayn waxaa loo bilaawi doonaa sida soo socota:
   1. Ugu yaraan 120 maalmood ayaa la siinayaa laga bilaabo biilka maalmoodka koowaad bukaanka la bixiyo kahor ECAs inta la qaadin waxayna Fairview bixin doontaa ugu yaraan muddo dhan 240 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda cadaynta xisaabta si bukaanka u codsado daryeelka samafalka hoostaga FAP.
   2. Haddii bukaanka codsaday daryeelka samafalka hoostaga FAP kahor inta aan la bilaabin kharash uruurinta sharciga ah, Fairview waxay go’aamin doontaa u qalmashada bukaanka inta aan la bilaawin ECAs. Haddii go’aan laga gaaray daryeelka samafalka bukaanka inta lagu gudoo jiro lixda bil ugu dambeyso, go’aanka hore ayaa la isticmaalayaa haddaysan xaaladaha bukaanka isku beddelin in tixgelin la siiyo.

3. Kahor inta xisaabaadka la dul dhigin kharash uruurinta sharciyaysan, Fairview waxay sameyn baaritaan tilmaamayo daryeelka samafalka si loo go'aamiyo haddii xisaabaad walba laga daynayo kharash uruurinta sharciga. KoontooyinkaKoontooyinkala dul dhigay kharash uruurinta sharciga, Fairview ayaa marka hore ogaysiis qoraal siinaysa bukaanka in loola jeedo ECAs. Ogaysiiskan waa inuu kujiraa qoraal kooban luuqad cad ku qoran ee FAP waana in la bixiyaa ugu yaraan muddo dhan 30 maalmood inta aan ECAs la bilaabin. Marka lagu guddo jiro 3o maalmood, Fairview waa inay samaysaa dadaalo macquul ah ay hadal ahaan ugu ogaysiinayso bukaanka in ECAs loo dan leeyahay waana in ay ogaysiiyaan bukaanka Xeerka kaalmada maaliyadeed ee Fairview. Tusaale dadaalka macquulka ah ee ogaysiiskan hadalka ah waxaa kamd ah wicitaanka bukaanka iyo fariin u dhaafid.
4. Kadib marka Kharash uruurinta sharciga la hoos geeyo, qareenka kharash uruurinta waa in loo oggolaadaa inuu sameeyo ECAs sida qorista tallaabooyin dacwo, qaadida xayiraadaha mushaarka iyo bangiga, iyo isticmaalka hababka kale sharciyeed ee kharash uruurinta; diyaarka ah, si kastaba ha ahaatee, waa in la helaa ogolaanshaha hore Adeega Maaliyadeed ee Bukaanka kahor billowga dacwooyinka. Howlahaas oo kale waa inay ku dhacaan Heshiiska Heerarka Kharash Ururruinta Qareenka Guud ee Fairview iyo HealthEast sida ku cad heshiiska labada qolo ka dhaxeeyo.
5. Haduu bukaanka soo gudbiyo codsiga daryeelka samafalka iyadoo ECAs socoto, Fairview waxay isticmaali dadaalada ugu wanaagsan inay hakiso ECAs halka codsiga laga howlgalayo lagana qaadanayo go'aanka.

IV. Adeega Macmiilka:

Xilliga lagu jiro hanaanka biilka iyo kharash uruurinta, Fairview iyo wakiiladeeda waxay bixinayaan adeega macmiilka iyagoo hirgalinaya tilmaamaha soo socda:

- Fairview iyo wakiiladeeda waxay xoojin doonaan heerka u dulqaadasho la'aanta luuqada cayda, kadeedida, weerarka, qiyaanada ama marin-hababinta ah ama habdhaqan xumada shaqaalaheea.
- Fairview iyo wakiiladeeda waxay hubin doonaan hanaanka isdhexgelinta su'aalaha bukaanka iyo/ama doodaha ay kamid yihiin lambarada teleefoonka la wacayo ee lacag la'aanta ah iyo ciwaanka xafiiska ganacsiga caanka ah ay warqad usoo qori karaan. Macluumaadkan waxay ku taxaalnaan doonaan Dhammaandhammaan biilalka bukaanka iyo caddeymaha xisaabaadka ee Fairview soo dirto.
- Kadib markaan akhbar ka helo bukaanka (wicitaan ama qoraal), Fairview iyo howlwadeenada wakiilada ah waxay isla markiiba ka jawabayaan wicitaanada teleefoonka ee bukanada (balse in aan ka badneyn hal maalmood howled kadib marka aad wacdo) waxayna qoraalada waraaqaha ka jawaabayaan mudoo dhan 7 maalmood guddahooda. Haddii waraqadaha loo arko cabasho, Fairview iyo wakiiladeeda waxay raaci doonaan Xeerka cabashada.
- Fairview iyo wakiiladeeda waxay furi doonaan galka dooda ee cabashada bukaanka (hadal ama qoraal ahaan).

V. Helitaanka Xeerka:

- Nuqulada elektorooniga ee Xeerka Biilka and Kharash Aruurinta, Xeerka Kaalmada Maaliyada ee Fairview iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa shabakadeena: www.fairview.org/billing.
- Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Xafiiskeena Ganacsiga 612-672-6724 ama lacag la'aanta lagu waco 1-888-702-4073 waxaadna codsan kartaa nuqulo caymiska in laguu soo diro ama aad kala munaaqashooto codsiga Daryeelka Samafalka iyo hanaanka u qalmashada.
- Nuqulada warqadaha xeerkeenaiyo foomamka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa xafiiskeena xisaabaadka ku yaala 400 Stinson Boulevard NE, Minneapolis, MN 55413-2614, iyo sidoo kale goobaha isbitaaladeena.

Helitaanka Xeerka HealthEast:

- Nuqulada elektorooniga ee Xeerka Biilka and Kharash Aruurinta, Xeerka Kaalmada Dhaqaale ee Fairview iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa shabakadeena: www.healtheast.org
- Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Xafiiskeena Ganacsiga 651-232-1100 ama lacag la'aanta lagu waco 1-866-770-6411 waxaadna codsan kartaa nuqulo caymiska in laguu soo diro ama aad kala munaaqashooto codsiga Daryeelka Samafalka iyo hanaanka u qalmashada.
- Nuqulada xeerarkeena iyo foomamka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa mid kasta oo kamid ah goobaha Isbitaaladeena.

Helitaanka Xeerka Xarunta Caafimaadka Fairview Range:

- Nuqulada elektorooniga ee Xeerka Biilka and Kharash Aruurinta, Xeerka Kaalmada Dhaqaale ee Fairview iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa shabakadeena: www.range.fairview.org/QuickLinks/fap.aspx.
- Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Xafiiskeena Ganacsiga 218-362-6624 ama lacag la'aanta lagu waco 1-877-390-6624 waxaadna codsan kartaa nuqulo caymiska in laguu soo diro ama aad kala munaaqashooto codsiga Daryeelka Samafalka iyo hanaanka u qalmista.
- Nuqulo warqadaha xeerkeena iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa laga heli karaa xafiiskeena xisaabaadka eek u yaala 750 E 34th Street, Hibbing, MN 55746.

**Oggolaashaha Heshiiska waxaa kamid ah balse aan ku ekayn kaliya**:

Xarunta Caafimaadka Fairview Lakes (Fairview Lakes Medical Center)way qaadatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka Fairview Northland way qaadatay Xeerkan.
Isbitaalka Fairview Ridges wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka Fairview Southdale wuu qaatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka Jaamacada Minnesota, Fairview way qaadatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka Fairview range way qaadatay Xeerkan
Isbitaalka HealthEast St. John wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast St. Joseph wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast Woodwinds wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast Bethesda wuu qaatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka HealthEast iyo hay'adaha kale ka reeban Canshuurta way qaateen Xeerkan.
Kooxda Caafimaadka Fairview way qaateen Xeerkan.

**MIlkiilaha Caymiska:**

Agaasimaha Hanaanka, Wareega Dakhliga

**Waxaa ansixiyay:**

Guddiga Agaasimayaasha Fairview

**Taariikh (aha):**

Taariikhda Dhaqangalka**:** 4/1/05

Taariikhda Dib loo saxay:**:** 4/03/12, 6/27/13, 3/5/14, 3/1/15, 2/1/16, 7/24/17

Taariikhda Dib-u-eegista: Guddiga Fairview ayaa Dib-u-eegis iyo Dib-u-ansixin ku sameeyay: 5/7/15, 6/17/16, 8/17/17

Taariikhda Dib loo saxay hirgelinta : 4/24/14, 5/7/15, 6/17/16, 11/1/17

## Related Guidelines

## Related Information